



## Maktabadda Yar ee Lacag la'aanta ee Lewis ayaa u furan in laga adeegto

Dugsiga Hoose ee Lewis wuxuu noqday ururkii ugu dambeeyay u fura [Maktabad Yar oo Lacag la'aan ah](#), kaasi oo ah barnaamij isticmaala sanduuqyo yar yar si buugaagta looga dhigo kuwo la helayo iyada oo la adeegsanayo falsafada ah “qaado buug, soo celi buug” In ka badan 50,000 Maktabaddaha Yar yar ee Lacag la'aanta ah ayaa la furay, iyaga oo goobo ku leh dhammaan 50 gobol iyo dunida hareeraheeda.

Macallinka Lewis ee Mark Richner ayaa mashruuca wax kaga qoray [bartiisa internet-ka ee fasalka](#):

Maktabadda Yar ee Lacag la'aanta ah ee Lewis ee cusub hada way furan tahay! Mashruucu wuxuu ku bilaabmay iyada lala imaanayo tallaabooyin badan oo loo baahan yahay si uu mashruucani u noqdo mid nololi ka muuqato. Carruurta waxay sameeyeen farshaxan iyaga oo muuqaaladooda ku sawiray maktabadda yar. Waxa ay abaabuleen meel buugaagta lagu ururiyo, iyaga oo sameeyay warqaddo la soo dhejiyo ‘posters’, meel macluumaadka lagu soo bandhigo, iyo fiidiyoow xayeysiin ah. Iyada oo ay tahay guul la gaaray, waxaan fiirinay in ka badan 1,000 buugaag oo lagu deeqay si looga hadlo farqiga dhanka kala duwanaanshaha ee u dhexeeya aqoonta carruurta iyada oo la ururiyay qaar ka mid xogta iyada oo la eegayo su'aalaha, “Waa sidee kala duwanaanshaha buugaagteena la ururiyay?” iyo “Sidee bay u kala duwan yihiin asalka iyo jinsiyadaha la matalayo?” Xaqiiji in aad fiiriso fiidiyoowgan oo ay carruurta ka sameeyeen [sida Maktabadda Yar ee Lacag la'aanta ah u shaqayso](#). Waa kuwan sawirrada qaarkood ee [rakibaada iyo buuxinta maktabadda yar](#). Waxaan hada doorka aan leenahay u wareejin doonaa in aan noqono wakiillada maktabadda.